# Macluumaadka ka qaybgalayaasha cilmi-baarista

Xarunta Qaranka ee Cilmi-baarista Bulshada (NatCen) waxay samaynaysaa cilmi-baaris si loo fahmo wacyiga iyo aragtida dadka ee ku aaddan isbeddellada lagu sameeyay nidaamka socdaalka ee UK.

Waxaan la hadlaynaa dadka:

- Magangalyo ka codsaday UK **markay taariikhdu ahayd ama ka dib Janaayo 2023** IYO/AMA
- Loo soo gudbiyay **Nidaamka Gudbinta Qaranka ee loogu talagalay dhibanayaasha laga yaabo inay la kulmeen ka ganacsiga dadka laga tirada badan yahay markay taariikhdu ahayd ama ka dib Janaayo 2023.**

Cilmi-baaristan waxaa maalgeliya **Home Office**, laakiin NatCen waa urur **madax-bannaan**. Tani waxay ka dhigan tahay in **aanan ka tirsanayn Home Office** ama dawladda, oo **ma samayno go'aanno ku saabsan in dadku sii joogi karaan UK iyo in kale.**

## Maxaan sameeyaa?

Ka qaybqaadashada waxay ku lug yeelan doontaa waraysi cilmi-baaris ah.

- Waraysigu waxa uu la yeelan doonaa **cilmi baadhe ka socda NatCen** waxana uu ku dhamaan doona **60-90 daqiiqo**.
- Waxaad ku samayn kartaa waraysiga **luuqad aan Ingiriisi ahayn** haddii aad rabto. Waxaan isticmaali lahayn turjumaan.
- Waxaad haysan kartaa qof ku taageera haddii aad rabto.
- Waxaad dooran kartaa inaad waraysiga ku samayso **telefoon, muuqaal, ama shakhsi ahaan** wakhtiga kugu habboon.
- **Haddii aad ogolaato, waxaanu duubi doonaa** waraysiga si aanu u hubino in aan la ilaawin wax aad tidhaahdo.
- Waxaad heli doontaa **£40 foojar wax iibsiga ah** si aan kaaga mahadcelino wakhtigaaga.
- Waxaa laga yaabaa inaan ku waydiino inaad ka qaybqaadato cilmi-baaris dheeraad ah si aad wax badan uga ogaato khibradahaaga.

## Maxaad iga weydiin doontaa?

Wareysiga ka hor, waxaan ku weydiin doonaa xoogaa su'aalo ah oo kugu saabsan, markaad timid, iyo codsigaaga socdaalka, si aan u hubinno in su'aalahayagu ay kugu habboon yihiin.

Inta lagu jiro wareysiga, waxaa laga yaabaa inaan ku weydiinno:

- Fahamkaaga ku aadan qaybaha kala duwan ee nidaamka magangalyada
- Khibradahaaga ku aaddan la macaamilka nidaamka magangalyada hadba meesha ay khuseyso

- Aragtidaada ku saabsan isbeddelladii dhawaan la sameeyay ama isbeddellada la soo jeediyay ee xeerarka iyo habraacyada magangalyada
- Sida isbeddelladani ay kuu saameyn karaan adiga ama dadka kale ee ku jira xaalado la mid ah xaaladaadaSocdaalkaaga UK

Kuma weydiin doono su'aalo ku saabsan waxa kugu dhacay dalkaagii asalka ahaa.

Wareysiga cilmi-baaristu maaha waraysi socdaalka - kama dhigna qayb ka mid ah kiiskaaga. **Ma gaadhno go'aamo ku saabsan in dadku joogi karaan UK, sidoo kalena la wadaagi mayno xogta waraysigan dadka go'aankaas gaadhaya.**

Waxaad dooran kartaa inaadan ka jawaabin su'aal kasta oo aadan rabin inaad ka jawaabto.

## Ma inaan ka qaybqaata?

**Ma aha in aad ka qayb qaadato** haddi aanad doonayn. Ka qayb qaadashada ama ka qaybqaadashada **wax saamayn ah kuma yeelanayso kiiskaaga socdaalka** ama xaqa aad u leedahay inaad halkan joogto hadda iyo mustaqbalkaba.

**Waxaad dooran kartaa inaadan ka jawaabin su'aal kasta oo aadan rabin waxaadna codsan kartaa in xogtaada laga saaro cilmi baarista** ilaa 6 toddobaad ka dib wareysiga, adoon bixin sabab.

## Maxaa ku dhici doona macluumaadka aan ku siiyo?

Iyadoo la raacayo sharciga ilaalinta xogta, dhammaan macluumaadka aad bixiso waxaa loo hayn doonaa si qarsoodi ah, loo kaydiyo si ammaan ah, oo la tirtiro dhammaadka mashruuca. Waxaan u qori doonaa warbixin Home Office oo ku saabsan arrimaha ugu muhiimsan ee aad ka wada hadasheen adiga iyo dadka kale ee isku duruufaha ah. **Cidna uma sheegi doono**, oo ay ku jiraan Home Office, cidda ka qayb qaadatay ama waxa ay shakhsiyaadka ka qaybgalayaashu sheegeen. **Kuma dari doono magacyo, lambar kiis ama faahfaahin** gaar ah warbixinta.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida aan u isticmaalno oo u kaydinno xogtaada waxaa lagu bixiyay www.natcen.ac.uk/migrantexperiences/privacynotice

## Halkeen ka heli karaa taageero kiiskeyga?

Ururada soo socdaa waxay awoodi doonaan inay bixiyaan taageero ama macluumaad ku saabsan nidaamka socdaalka.

**Migrant Help**
**Mareegta:** www.migranthelpuk.org
**Khadka caawinta** (telefoonka bilaashka ah 24 saacadood maalintii): 0808 8010 503
**Iimayl:** Kala xidhiidh Migrant Help adigoo isticmaalaya webchat ama foomka waydiinta onlaynka ah. .

**Refugee Council**
**Mareegta:** www.refugeecouncil.org.uk
**Khadka caawinta** (9:30 subaxnimo -12:30 galabnimo Isniin - Khamiis): 0808 196 7272

**Iimayl:** refugeeadvice@refugeecouncil.org.uk

**Samaritans**

**Mareegta:** www.samaritans.org
**Khadka caawinta** (telefoonka bilaashka ah 24 saacadood maalintii)**:** 116 123

**Iimayl:** jo@samaritans.org

## Nala soo xiriir

Haddii aad **wax su'aalo ah qabtid ama aad jeceshahay inaad beddesho wakhtiga waraysiga** , fadlan nala soo xidhiidh.

- migrantresearch@natcen.ac.uk
- 0808 168 2791
- www.natcen.ac.uk/migrantexperiences

Waxaa jira tiro kooban oo meelo ah oo cilmi-baaristan ku jira. Taas macnaheedu waxa waaye **in aynaan awoodin inaan wareysanno qof kasta oo noo sheega inuu jeclaan lahaa inuu ka qaybqaato.**